



# Waxbarashadii Guryaha Lagu Qaadanayey ee Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) Waxa ay Sii Socon Doontaa Ilaa Bisha Janaayo 28keeda

Oktoobar 7, 2020

Waalidiinta iyo Shaqaalaha PPS ee Qaaliga ah,

Shirkii xalay ee Golaha Waxbarashada, Guddoomiyaha Waxbarashada Guerrero waxa uu ku shaaciyey qorshayaasha lagu kordhinayo Waxbarashadii Guryaha ay Ardaydu Qaadanaysay (CDL) ilaa rubuca labaad ee waxbarashada dugsiyada oo dhammaanayo Janaayo 28keeda. Go'aankan oo lagu saleeyey xogtii ugu dambeysay ee caafimaadka dadweynaha; waxa aan rajeyneynaa ogeysiiskeena ka xigaa wuxuu noqon doonaa xilliga jiilaalka ka dib kaasi oo ka gedisnaan doona, iyada oo aan doorbidi doono in aan ku noqono iskuuladeenii.

Waxa aan si dhow ula soconeynaa haddii ay tahay degmada iyo gobolka [qiyaasaha xanuunka COVID-19](#). Si ay inoogu suurtagasho in waxbarashada lagu qaato mid isku dhafan oo (qeyb iskuulka lagu qaadanayo/qeybta kalena lagu qaadanayo guryaha), waa in la buuxiyaa shuruudaha hoos ku taxan:

- Waa in Degmada Multnomah **100,000** qof xanuunka **COVID-19** laga helaa 10 qof ama in yar 7 maalmood muddo 3 todobaad oo isku xigta
- **Dadka xanuunka laga helo** ee degmada Multnomah waa in ay noqdaan boqolkiiba 5% ama ka yar muddo 7 maalmood ah 3 todobaad oo isku xigta
- Dadka xanuunka laga helo waa in ay noqdaa boqolkiiba 5% ama wax ka yar gobolka oo dhan 7 maalmood ee ugu dambeeyey muddo 7 todobaad oo isku xigta
- Iyo, marka la eego in boqolkiiba 10% ama ka badan oo shaqalaaheena ah inay ku nool yihiin Degmada Clackamas iyo boqolkiiba 10% kale oo iyaguna ay ku nool yihiin Degmada Washington, waa in aan sidoo kale tixgalinta siinaa qiyaasaha iyo isbedelada ka dhacaya degmooyinkaasi.

Waxa aan rabnaa in qiyaasaheenu ay noqdaan kuwa si weyn uga wanaagsan qiyaasihii hore. Waxaan ka codsaneynaa qof kasta oo ka mid ah bulshadeena inuu xil iska saaro wixii kagaga soo aadan sidii loo ilaalin lahaa caafimaadkeena, oo ay ka mid tahay in qof kastaa xirto maaskarada afka lagu daboolo. Taasi waxa ay inoo fududeydn doontaa in qiyaastu timaado meel ay suurtagal noqoto in ardaydeenu ay ku soo noqdaan iskuuladii iyo fasaladii waxbarashadooda ay ku qaadan jireen.

Ilaa iminka, waxa aan sii wadi doonaa in aanu ardaydeena iyo qoysaskoodaba siino [addeegyo iyo gargaar](#) ballaaran oo kalana gedisan, iyada oo sidoo kalena aan diirada saareyno sidii loo horumarin lahaa Waxbarashadeena Guryaha Lagu Qaadanayo ee ardaydeena fasalada kale duwan ka kooban. Waxa aan sidoo kale ka shaqeyneynaa sidii loo kordhin lahaa tirada fursadaha la siinayo kooxo ardayda ka mid ah oo gaar ah iyo kuwa kale oo loo arko inay u baahan yihiin, hawlihii iskuulada ay ardaydu ku qaadan



jireen. Taasi buu ahaa arrinkayagu kuna salaysnaa go'aan-qaadashada xanuunku, mudnaanta koowaad iyaduna waxa weeye caafimaadka iyo fayo-qabka ardaydayada iyo shaqaalaha iyada oo aan sii wadi doono inaan si dhow ula socono qiyaasaha caafimaad ee ay Hay'ada Caafimaadka Oregon daabacdo.

Waxa aan sii wadi doonaa inaan idinla socodsiino wixii cusub ee dhinaca horumarka laga sameeyo iyo go'aanada la tixgaliyo ama la sameeyo. Marka la gaaro rubuca saddexaad waxbarashada iskuulada, waa idinla soo xiriiri doonaa wixii go'aan ah sida ugu dhakhso badan marka laga soo noqdo fasaxa xilliga jiilaalka.

Sidii caadada ahayd, fadlan waxaad booqataan [pps.net/fall2020](https://pps.net/fall2020) wixii warar ah ee ugu dambeeyey, sidoo kale macluumaad ah iyo [agabka qoyska iyo ardayda](#).

Waxa aan dhammaanteen jecelnahay in aan fasaladii ku noqono. Si weyn baan ugu boholyownay ardaydayadii, iyada oo aan idiinka mahadcelineyno dabacsanaantiina iyo fahamka fiican ee aad ka qabtaan sidii aan u raadin lahayn inaan wada jir uga baxno xanuunkani. Waad mahadsan tihiin.